

# **Waaxda Gaadiidka ee Seattle (SDOT) & Hey'ada Guryeynta ee Seattle (SHA) Barmaanijka Gaadiid Raaca -Janaayo 2023**

SOMALI



1.2023



**Seattle**  
Department of  
Transportation



# **Waa maxay Gaadiid Raaca (Transit Pass) SHA?**

Barmaanijka Gaadiid Raaca SDOT iyo SHA waa nooca kaarka Orca oo si buuxda loo taageerey oo ay helaan dhamaan dadka dega guryaha ay leedahay SHA amase ay maamusho. Ka qayb galayaasha barmaanijka waxay heliyaan gaadiid raac aan xad laheyn ilaa Dhiseembar 31, 2026. Kaararka waxaa lagu shubaa kaarka ORCA ama kaadhka baska.

## **Sideen u dalban karaa SHA Transit Pass?**

Haddii aad tahay codsade cusub, fadlan ku buuxi codsiga onlaynka ah [www.surveymonkey.com/r/SHAIntakeForm](https://www.surveymonkey.com/r/SHAIntakeForm). Booqo websaydkayaga [www.Seattle.gov/transportation/transitpassprogram](http://www.Seattle.gov/transportation/transitpassprogram) ama wac 206.615.3551 wixii macluumaad dheeraad ah.

## **Sida Loo Isticmaalo Kaarkaaga Cusub ee SHA Transit**

Ka qayb galayaasha barmaanijka waxay heliyaan gaadiid raac aan xad laheyn ilaa Dhiseembar 31, 2026. Kaarkaaga waxa la isticmaali karaa 24 saac maalintii, todobada maalmood asbuucii.

**Bas:** Ku aadi kaarka ORCA akhristaha markaad baska raacayso. Jiid xarigga jaalaha ah ka hor joogsigaaga si aad u ogaysiiso darawalka in aad jeclaan lahayd inaad ka dagto.

**Tareenka Fudud & Baabuurka Jidka:** Ku aadi kaarka ORCA goobta ka hor intaadan fuulin tareenka iyo mar labaad markaad ka baxdo tareenka.

## Xagee ku isticmaali karaa Gaadiid Raaca SHA?

Gaadiid Raaca SHA waxaa lagu shubey kaarka Orca. Wuxaad u isticmaali kartaa si kharash la'aaneed gaadiidka dadweynaha ee King County Metro, Doonta Tagsiga ee King County, Gaarida magaalada, Tareenka Magaalada ee Monoroail, Gaadiidka Sound, Gaadiidka Bulshada, Gaadiidka Dadweynaha ee Pierce, Gaadiidka Dadweynaha ee Kitsap, iyo Gaadiidka Dadweynaha ee Everett. Waxa kale oo laga yaabaa inaad hesho kaarka ORCA ACCESS ama Via to Transit. Kaararka ORCA lagama yaabo in lagu isticmaalo Doomaha Gobolka Washington.

## Ma u baahan tahay hagitaan caawineed?

Waxaa jira dhowr ilo oo kaa caawinaya sida loo isticmaalo nidaamka gaadiidka Seattle:

**Hal Bas Buu Jiraa:** Soo deji mareegtadan (app kan) foomka ah si'aad u hesho macluumaadka imaanshaha waqtiga dhabta ah ee basaska iyoo tareenka fudud.

**Khariidadaha Google:** Wuxaad ku isticmaali kartaa Khariidadaha Google-ka kumbuyuutarka ama abka talefoonka. Waxay bixisaa tilmaamo ku-meel-gaar ah oo ay ku jiraan macluumaadka imaanshaha-dhabta ah.

**Qorsheeyaha safarka ee King County:** Istimaal mareegtadan (boggan) si'aad u hesho tilmaan safarkaaga <https://tripplanner.kingcounty.gov/>

## **Imese Ayaan Isticmaali Karaa Gaadiid Raaceyga ee SHA?**

Gaadiid Raaca aan xadka laheyni waxuu dhacayaa dhamaadka Dhiseembar 31keed 2026.

Hadii aad walaac ka qabtid inaad awoodid gaadiidka markuu dhamaado barmaanijken, waxaan kugu boorineynaa inaad booqoto shabakada Gaadiidka ee King County si'aad u go'aansato midka kuugu qiimo jaban oo u ku haboon baahidaada. <https://kingcounty.gov/WhichORCAFare>

## **Beddelista kaarka dhumay ama Halaabay**

Hadii kaarkaagu dhumo amase xumaado, waanu badaleynaa iyadoon waxba lagugu dalacin. Fadlan la xiriir SHA adoo la wadaagaya magacaaga iyo cinwaankaaga si'aad u dalbato badalaad kaar. Kaarkaagii hore waa la xiri doonaa marka lagu siiyo kaar cusub.



## **MACLUUMAADKA XIRIIRKA**

**limeyl:** [TransitPass@seattlehousing.org](mailto:TransitPass@seattlehousing.org)

**Wac/qoraal:** 206.615.3551

**Bogga internetka:** [www.seattle.gov/transportation/TransitPassProgram](http://www.seattle.gov/transportation/TransitPassProgram)